

ITB MA GALO

FAAFINTA RASMIKA AH

الجريدة



رسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOMALIA

Sannadka 16aad Muqdisho, 25ka Maajo 1988 Lr. 1 R 5

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **BUKUNKA:** Sanaadi waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddeda waa Shs. 200. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gaayey waxuu ka bilobmaa 1 Janaayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faaifinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee

K O O B N I I N

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 13 ee 4 Maajo 1988, Dhismaha Shir.

kadda Farsamada Doonyaha iyo Qalabka

kale ee Caagga ah.

Bog;

379

QAYBTA

LABAAD

W. M.

QAYBTA

SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 7.3.87, Naado

Dhul J.le Xabiiba Maxamed Siyaad L.255 »

381

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 7.3.87, Naado

Dhul J.le Aadan Xaashj Nuur L. 256 »

382

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 13 taariikh 4 Maajo 1988: Dhismaha Shirkadda Farsamada Doonyaha iyo Qalabka kale ee Caagga ah.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Gojaha Shaabiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciiga soo socda:

Qod. 1aad
(Dhismaha Shirkadda)

Waxaa la oggolaaday in la dhiso Shirkadda Doonyaha iyo Qalabka kale ee Caagga ah, laguna dhiso heshiiska 14.12.1987 oo ay wada jeeyihiin Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo ay Wakiil ka tahay Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Gaadiidka Badda iyo Shirkadaha Sweden ee KMAB iyo SEDFUND.

Qod. 2aad
(Saamiga)

Saamiga ka qeyb galka hantida Shirkadda ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya wuxuu noqonayaa 51% (konton iyo kow boqolkiiba), Shirkadaha Swedena waxay yeelanayaan 49% (afartan iyo sagan boqolkiiba).

Qod. 3aad
(Ujeeddooyinka Shirkadda)

Shirkaddu waxay yeelanaysaa ujeeddooyinka soo socda:

1. In ay samayso doonyo iyo qalab kale oo ka samaysan «Glass Fibre Reinforced Polyester»;
2. In ay ka qeyb qaadato horumarinta Xeebaha Soomaaliyeed iyada oo samayn doonta doonyo, waxayna ku iibinaysaa doonyahaas qiimo u dhigma kan doonyahaas oo kale jalgaga soo iibsan lahaa dibadda;
3. In ay wax ku kordhiso lacagta adag ee dalka soo ga.

4. In ay si dhab u hirgeliso ku wareejinta habka sanco farsamo_yaqaanada Soomaaliyeed;

5. In ay samayso doonyo kala waaweyn si ay u suura-gasho in ay **Shirkaddu** mustaqbalka u noqoto aasaaskii san-cada maraakiib **samaynta Soomaaliyeed**.

Qod. 4aad
(Canshuur Dhaaf)

Waxaa la oggolaaday in Shirkadda laga dhaafo muddo shan sano ah **Canshuuraha** soo dejinta iyo **Canshuuraha** dakhliga. **Shantaas** sano waxay ka bilaabanayaan 1.1.1987.

Qod. 5aad
(Habka Dhismaha Shirkadda)

Dhismaha Shirkadda iyo **Maamulkeeda** waxaa ja waa-fajinayaa **Sharciyada Dalka** ka jira ee khuseeya **Shirkadaha** Saamijlayda ah iyo **maal-gelinta Shisheeyaha**.

Qod. 6aad
(Baabi'jin)

Waxaa la baabi'iyay **Sharcigii** hore ee lambar 8 ee 18.5.1983 ee lagu dhisay **Warshadda Doonyaha Caagga** ah.

Qod. 7aad
(Dhaqan gal)

Sharcigani wuxuu **dhaqan gelayaa** laga bijaabo 1.1.1987, waxaana lagu soo saarayaa **Faafinta Rasmiga** ah ee **Jamhuuriyadda**.-

Muqdisho, 4 May 1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)